Khiyaarrada kale ee guri helidda

Ilaa imika oo ah 21/06/10, waxaa jira ilaa 13,012 oo reer oo ku jira Diwaaanka Guryaha ee Bristol. Hase ahaatee guryaha bulshada ee Brisitol laga helaa way xaddidanyihiin, waxaana banaanaada sanadkii 2500 ilaa 3000 oo guri oo kaliya.

Guryaha waxaa la isku siiyaa iyada oo la tixraacay qorshaha Mardinta iyo Guri siinta. Codsadayaasha ku jira mardinnada sareeya (Mardin 1 ayaa ugu saraysa mardin 5na way ugu hoosaysaa) ayaa mudnaan ka leh in guri la siiyo kuwa ku jira mardinnada hooseeya sidaa darteedna uga dhow in guri la siiyo. Si aad xog dheeraad ah uga hesho sida mudnaanta loo kala siiyo codsiyada, aad Prioritising applications.

Hase ahaatee, xataa codsadayaasha mardinnnada sare ku jira ayaa laga yaabaa inay ku adkaato inay guri ka helaan diiwaanka guri siinta. Waxaa laga yaabaa inay arrintan sabab u tahay baaxadda guriga ay u baahanayihiin, maadaama ay jirto inay aad u yaryihiin guryo leh afar qoljiif iyo wixii ka badan. Sidoo kale, meelo ka mid ah magaalada, sida Clifton matalan, guyo la'aan guud baa ka jirta.

Codsadayaasha ku jira mardinta 4 & 5 gud fursaddooda ah inay guri ka helaan diwaanka gurisiinta aad bay u hoosaysaa., sidaa darteed waxaa hoos ku qoran xog dhheeraad ah oo ku saabsan siyaabo kale ood guri ku heli karto.

Fadlan ogow inuusan kownsilku ka masuul ahayn waxa ku qoran bog internet oo uusan isagu lahayn.

Mashaariicda guryaha lagu yeesho ee kharashka yar

Haddii aad doonaysid inaad guri iibsato aadanna suuqa furan ka iibsan karin, sababtu ha ahaato inaadan daynta guriga lagu qaadanayo heli karin amaba lacagta carbuunta ah, ama labadaba, markaa guri yeelashada kharashka yaar ayaa laga yaabaa inay khiyaar kuu tahay. Qorshayaasha qaar ayaa kuu ogolaanayo inaad guri qayb ka yeelato, iyada oo laguu ogolaanayo inaad saamiyo kale sii iibsato waa danbe. Mashaariixda qaarna waxay ku siinayaan dayn aad ku iibsato gurigaad doonto.

Si aad xog dheeraad ah oga hesho mashaariicda guri yeelashada kharashka yar, fadlan booqo bogga internetka ee South West Homes www.southwesthomes.org.uk

South West Homes waa wakiilka HomeBuy ee Konfur Galbeed. Wakiillada HomeBuy ayaa maamula qorshayaasha Homebuy ee guyaha cusub iyo suuqa furan, oo ku caawiya dadka xaqa u leh ee markii ugu horaysay guri iibsanaya inay guri iibsadaan.

Haddii aad go'aansato inaad doonayso yeelashada guyaaha kharashkoodu hooseeyo, adiga oo codsi u gudbisanaya South West Homes, hadddana waxad u baahantahay inaad ka codsato diiwaankannaga gurisiinta.

Kiraysiga Guri Khaas loo leeyahay

Haddii aad codsi u kensatay Diiwaanka guri siinta oo aan kuu sheegnay inaadan mudnaan sare ku lahayn qorshahnnaga mardinta, aadse doonayso inaad guri kugu habboon meel kale ka hesho, waxaa laga yaabaa inuu kugu habboonyahay inaad kiraysato guri gaar loo leeyahay. Kiraysiga guri gaar loo leeyahay waxa uu kuu sahlayaa inaad doorato xaafadda aad rabto iyo nooca guriga aad rabto.

Waxaa jira siyaabo badan oo loo helo guryo kiro ah oo gaar loo leeyahay, oo a oo ay ka mid tahay wargaysyada deegaanka iyo bogagga internetka ee guryaha.

Bristol Association of Letting and Management Agents (BALMA) waa isu tagga wakiilada kiraynta oo hadafkoodu yahay inay bixiyaan adeeg la aamini karo oo la isku hallayn karo.

Si aad xog oga hesho BALMA iyo xubnahiisa halkan riix halkan

www.findaproperty.com waxaa ku yaalla faahfaahinta guryo kiro ah oo ku yaalla Bristol iyo nawaaxideeda ama ha la wadaago ama ha kuu gaar ahaadeene.

Buugyaraha Xogta Kiraystayaasha guryaha gaarka loo leeyahay
Waxaan soo saarnay buugyare xog buuxda ay ka helayaan kiraytayaasha guryaha gaarka loo leeyahay. Waxuu ka hadlayaa waxyaabo badan oo ay ka mid yihiin:

- Sida guri loo helo
- Waxaad samaunayso marka aad guri cusub ku guurto.
- Inta aad guriga ku nooshahay
- Ka gurrista gurigaada
- Faahfaahin meelo lala xiriiro oo waxtar ah
- Liistada hubinta ee guryaha

Si aad xog dheeraad ah u hesho, amaba si aad usoo dajisato nuqulka buugyaraha, fadlan riix halkan

Ka caawin bixinta kiradaada

Kirada guryaha gaarka loo leeyahay way sarraysaa, waxayna sida badan u ekaan kartaa inaan la goyn karin. Hase ahaatee, haddii aad gunno qaadato, amaba aad shaqaynayso dakhligaaduse yaryahay, waxaad xaq u yeelan kartaa inaad codsato gunnada kirada guryaha iyo canshuurta deegaanka.
Si aad xog dheeraad ah oga hesho qaadashada Gunnada Kirada Guryaha iyo Canshuurta Dewegaanka, fadlan booqo boggannaga internetka

www.bristol.gov.uk si aad u aragto inaad xaq u leedahay in lagaa caawiyo kiradaada amaba canshuurtaada deegaanka, waxaad isticmaali kartaa Xisabiyaha Gunnooyinka ku yaalla internetka. Waxaa kale ood imaan kartaa mid ka mid Goobaha Adeegga Macmiilka ood kala hadli kartaa Lataliye Macmiil.

Waxaad toos adeegga Gunnooyinka kala xiriiri kartaa:

Telefoon - (0117) 922 2300
Faxakis- (0117) 903 7051
Boosto - Housing and Council Tax Benefits, PO Box 43, Bristol, BS99 1BF

Ma qaamaysantahay ama ma ka walwasantahay Dayntaada guri?

Haddii aad ka walwalsantahay dayn oo aad u baahantahay talo, fadlanm booqo bogga Credit Action web site ee www.creditaction.org.uk
Haddii aad doonayso cid deegaanka ah oo kaa caawisa mashaaklilkaada daymeed, Bristol Debt Advice Centre ayaa siisa dadka qaamaysan la talin madax banaan oo bilaash ah. Xog dheeraad ah ayaad ka heli kartaa boggooda internetka www.bdac.org.uk

Haddii aad la rafanayso bixinta dayntaada guri amaba ay ku soo waajahday gurigii oo lagaa qaadanayo, bogga internetka ee Directgov ayaa talooyin badan bixinayaa oo ku saabsan sidaad gurigaada u haysan lahayd, iyo waxaad samaynayso haddii ay cidda daynta guriga ku siisya maxkamad ku gayso.

Isku-badalka

Isku-badalka la isku waafaqo waa marka aad gurigaaga iyo heshiiska ijaarkiisa aad ka badalato ijaarte kale oo ku jira guri kouwnsulku ama ururka guryahu ay leeyihiin. Hadaba tani waxa ay suurtogal tahay hadii heshiiska ijaarkaagu yahay mid sugan (secure tenant). Isku-badalka la isku waafaqo waa hanaan ka dhaqso badan marka aad raadinayso in guriga lagaa badalo.
Xaafada 'Bristol City Council' iyo lamaanayaal kale waxa ay ku wada heshiiyeen adeegan oo u bilaash ah ijaartayaasha. 'HomeSwapper' waa website qarameed oo lagu soo bandhigo isku-badalka. Hadaba tani macnaheedu waxa weeyi in aad ka raadin karto isku-badalaada guryaha ee Bristol ama meel ka baxsan. Sidoo kale hadii uu website-ka soo galo guri u dhigma ka aad rabtay oo isku badalka waafaqsan, waxaa lagugu soo wargalin doonaa E-mail-ka ama text-ka.

Waxana halkan ku taxan magacyada Mulkiilayaasha Guryaha ee Bristol ee ku wada saxeexay heshiiska adeegan.

Fadlan booqo shabakada www.homeswapper.co.uk si aad isaga diiwaangaliso adeegan. Hadii aadan guriga ku haysan kombuyuutar, waxa aad isticmaali kartaa sahalada iskaa aad u isticmaali karto ee yaala Baraha Adeega Macaamiisha (Customer Services Points), ama kombuyuutarada yaala maktabadaha dadweynaha.

Marka aad hesho qof aad isku waafaqdaan isku-badalka guryaha waxaa waajib ah in aad labadiinuba buuxisaan foomamka codsiga isku-badalka oo aad u gudbinaysaan mulkiilaha guryahiina idinka oo ka codsanaya ogolaanshaha in aad isku-badali kartaan. Mana la ogola isku-badalka ilaa labada daraf ay mulkiilayaasha guryaha.ka helaan ogolaansho qoran oo rasmi ah

Helitaanka macluumaad dheeraad ah fadlan halkan guji

Guri siinta iyo caawinta waayeelka

Haddii aad ku tallamayso inaad ka guurto guriga aad hadda ku jirto, waxa laga yaabaa inay habboontahay inaad tixgaliso khiyarrada kale ee kuu furan.

Xog dheeraad aah oo ku saabsan gurisiinta waayeelka ayaad ka heli kartaa haddaad riixdo halkan.
Waxaa laga yaabaa inaad go'aansatay in hoy gabbaad lihi uu yahay khiyaarka kugu wacan adiga. Bristol City Council waxay leedahay 28 qorshe oo magaalada oo dhan ku yaalla oo u suuragaliya waayeelka inay si madax baanaani ah u noolaadaan iyada oo ay heli kara taageero dagdag ah 24 saacadood maalinkiiba.

Si aad uga hehso xog dheeraad ah guryaha gabbaadka leh ee Bristol City Council ugu talagashay waayeelka, guji halkan

Haddii aad jirto 50 amaba ka badan ood doonayso inaad madaxbanaanidaada haysato, waxaa laga yaabaa inaad qorshaha ku darsato guryaha ay waayeelka doorka bidaan. Guryaha ay waayeelku doorka bidaan waa guryo isku dhax jira oo gaar ah sida kuwa kor loo fuulo, guryaha dabaqyada ku yaalla iyo guryo dhulka ku yaalla oo kala go'an iyo guryaha layslku kabay oo ku kala yaalla magaalada Bristol.

Si aad xog dheeraad ah oga hesho guryaha loo doorka bido waayeelka, fadlan riix halkan
Siaad xog oga hesho guryaha gabbadka leh, waxaa laga yaabaa inay ku anfacdo inaad booqato Directgov

Housing associations-ka Bristol qaar ayaa leh guryo loogu talagalay waayeelka, si aad wax uga sii ogaato housing associations-ka Bristol ku yaalla gal HCB Landlords.

Bristol Care and Repair waa hay'ad samafal oo u adeegta waayeelka iyo curyaannada Bristol. Care and Repair waxay bixisaa adeegyo kala duwan, oo ay ka mid yihiin:

- Ka caawinta iyo kala talinta helidda deeqaha
- La qabadsiinnada waawayn iyo hagaajinta
- La qabadsiinnada yaryar iyo hagaajinta

Si aad xog dheeraad ah oga hesho adeegyada ay bixiso halkan

Very Sheltered Housing (Guryaha gabbaadka aadka ah leh)

Guryaha ah Very Sheltered Housing waxaa loogu tala galay dadka ka wayn 65 jirka, laakiinse haddii aad curyaan tahay, ay waxbarashadu kugu adagtahay, ama aad qabto xanuun dhimir markaa waxaa laga yaabaa inaad xaq u eleedahay in lagu siiyo haddii aad ka wayntahay 55 sano.

Guryaha badankooda waa kiro waxaana la siinayaa dadka liistiga sugitaanka ugu jiro xanuun iyo Daryeel Bulsho owgood. Si liistigan laguugu daro la xiriir Care Direct si aad u codsato in laguu qiimeeyo Very Sheltered Housing. Haddii aad horaan u leedahay social worker (Howl wadeen bulsho), fadlan u sheeg Care Direct.

Si aad ula xiriirto **Care Direct**, fadlan wac 0117 922 2700.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan guryaha gabbaadka aadka halkan.

Xog kale iyo xadhko wax tar ah

Sofa Project – Haddii aad guri u guurayso una baahantahay alaabtii guriga, Sofa Project ayaa haysa alaabo cusub, mid cusaybka ku dhow, iyo mid horaan loo soo isticmaalay, alaabta guryaha iyo qalabka korontada ah oo qiimo jaban jooga, iyaa oo waliba qiimaha ka sii jabinaya dadka dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa gunnada qaata. Xog dheeraad ah si aad u hesho, fadlan riix halkan.

Directgov – Boggan waxa uu hal meel ah ku taxayaa dhammaan adeegga guud. Hadii aad talo oga baahantahay wax kasta laa billaabo ka walwalka daynta guryaha ilaa waxbarashada, fadlan riix halkan

Bristol City Council - Boggannaga intenetka waxa aad ka helaysaa talooyin badan, oo ku saabsan Gunnada Guryaha ilaa xog ku saabsan guri siinta.

School admissions – Boggan internetka ah waxaa ku yaalla la talin ku saabsan galidda dugsiyada hoose iyo u wareegga dugsiyada sare. Boggan laftiisa ayaad ka codsan kartaa si aad meel oga hesho iskuul. Si aad xog dheeraad ah u hesho, fadlan riix halkan.

Fadlan ogow in kownsliku uusan masuul ka ahayn waxa ku yaalla bogagga internetka ee ka baxsan kiisa.